

# Dowladda Soomaaliyeed ee Puntland Wasaaradda Qorsheynta, Horumarinta Dhaqaalaha iyo Iskaashiga Caalamiga ah Waaxda Tirokoobka Puntland



## TUSAHA SICIRKA ADEEGGA DAMBIISHA

### OKTOOBAR 2020

## Warbixinta Tusaha Sicirka Adeegga Dambiisha ee Bisha Oktoobar

### Dhaqdhaqaaqa Billaha ee Tusaha Sicirka Adeegga Dambiisha


Tusaha Guud ee Sicirka Adeegga Dambiisha (TSD) qeybahiisa kala-duwan ayaa intii lagu guda jiray bishii Oktoobar 2020 gaaray 89.23 halka uu bishii ka horeysay ee Sebteembar ka ahaa 89.05. Isbedelka bishii dhammaatay ee Oktoobar ayaa ahaa koror dhan 0.20 boqolkiiba, halka bishii ka horeysay ee Sebteembar 2020 jiray kor u kac dhan 0.09 boqolkiiba.

Qeybaha badeecadaha ee sicirkoodu bishaan sida xoogan kor ugu kacay marka loo eego qeybaha kale ayaa kala ah: Caafimaadka (1.92%), Isgaarsiinta (1.44%), Kirada guryaha Korantada iyo Biyaha (0.51%), Qeybaha Dharka iyo Kabaha (0.12 %), qeybta badeecadaha isku jirka ama isku dhafka ah (0.06%).

Dhinaca kale, kor u kaca ku yimid sicirka qeybaha kor ku xusan waxaa qeyb ahaan dheelitiray hoos u dhac ku yimid sicirka qeybaha Tubaakada Iyo Qaadka (-1.45%), Maqaaxiyaha iyo Hoteellada (-0.97%). Iyo Agabka qalabeynta, qurxinta iyo hagaajinta guryaha (-0.56%),

Tan ayaa horseeday isu dhawaanshaha heerka tusaha Guud iyo Jiitimaad ku sugnaanshaha Jaantuuska dhaqdhaqaaqa Tusaha guud ee sicirka dambiisha adeegga.

### Jaantuuska Iaad: Jaantuusyada Heerka Sicir Baraka Iyo Dhaqdhaqaaqa Tusaha Guud Ee Sicirka Dambiisha Juun 2020




### Jadwalka Iaad: Heerka Sicir bararka billaha ah ee -Oktoobar2020 (2015=100)

Tusaha Sicirka Dambiisha, Juulay	
Tusaha (bishan) = Oktoobar2020	89.23

Tusaha (bishii hore) = Sebteembar 2020	89.05
Tusaha (sanadkii hores isla bishan) = Sebteembar 2019	84.55
Isbedelka % bilaha ah = Sebteembar 2020/ Oktoobar2020	020
Isbedelka % sanadlaha ah (heerka sicir bararka) = Sebteembar2019/Oktoobar2020	5.53

### Jaantuuska 2aad: TSD, Isbedellada Ugu Waaweyn Ee Bilaha Ah Iyada Oo Loo Eegayo Hanaanka Caalamiga Ah Ee Kala Saarida Qaybaha Badeecadaha.



### Qaybaha Isbedelka uga badan ee dhanka Togan Ku Yimid Bisha Oktoobar2020

- **Caafimaadka:** Sicirka adeegga iyo qalabka caafimaadka ayaa bishii gudubtay ee Oktoobar waxay siyaadeen (1.92%) marka la barbardhigo bishii ka horeysay ee Sebteembar oo la diiwaangeliyey qiimo kac gaarayey (3.75%). Sicirk kac bishaan ayaa loo tirinayaa koror ku yimid Qiimaha Adeegga bukaan socodka (3.40%), Agabka, qalabka iyo Daawada caafimaadka(0.45%).
- **Gaadiidka:** Sicirka adeegga safarka iyo gaadiidka ayaa bishii gudubtay ee Oktoobar waxa uu siyaadey (1.44%) marka la barbardhigo bishii ka horeysay ee Sebteembar oo la diiwaangeliyey qiimo kac gaarayey (0.39%), Sicirk kac bishaan ee qeybtaan ayaa loo sababeynayaa koror ku yimid Qiimaha Raacida Gaadiidka (2.25%)
- **Kirada Guryaha, Biyaha, Korantada iyo Gaaska** ayaa sicirkooda kor u kacay (0.51%) bishii dhammaatay ee Oktoobar 2020 marka loo-barbar dhigo bishii Sebteembar oo u ahaa (-0.28 %). Qiimo kaca bisha Oktoobar waxaa keenay sicirka Hagaajinta iyo dayactirka guryaha oo kacay (1.48%).
- **Dharka Iyo Kabaha** sicirkooda ayaa bishii Oktoobar2020 kor u kacay (0.12%) marka la barbar dhigo bishii Sebteembar oo la diiwaan geliyey koror dhan (1.95%) , kor u kaca bishaan waxaa loo tirinayaa qiimaha Kabaha oo siyaadey (0.14%).
- **Qaybta Adeegyada isku dhafka ah (Miscellaneous):** badeecadaah iyo adeeyada ay ka

koobantahay qeybtani ayaa bishii gudubtay ee October waxaa sicirkoodu kordhay (0.06%) halka bishii ka horeysay ee Sebteembar ay qeybtani waajahday koror dhan (3.37%),

- **Cuntada Iyo Cabitaanadda** sicirkooda ayaa kor u kacay (0.01%) bishii dhammaatay ee Oktoobar2020 marka loo-barbar dhigo hoos u dhicii bishii Sebteembar oo ahaa (-0.85%). Qiimo kaca qeybta cuntada iyo cabitaanada ee bisha Oktoobar waxaa keenay sicirka Cuntada oo kor u kacay (0.02%).

### Qaybaha ugu muhiimsan ee isbedelka taban ku yimid bisha Oktoobar 2020

- **Sicirka Tubaakada iyo Qaadka** ayaa intii lagu guda jiray bishii tagtay ee Oktoobar2020 hoos u dhacay (-1.43%) Marka loo eego bishii ka horeysay ee Sebteembar oo uu jiray kor u kac dhan (0.75%) hoos u dhaca bishaan ayaa waxaa keenay Qaadka (3.61%).
- **Sicirka cunnada iyo adeegyada Maqaaxiyaha & Huteelada** ayaa bishii tagtay ee Oktoobar waxaa ku yimid hoos u dhac dhan (-0.97%) halka bishii ka horeysay ee Sebteembar ay qeybatani diiwaan gelisay kor u kac gaaraya (1.58%), hoos u dhaca bisha Oktoobar waxaa loo aanaynayaa adeegga Makhaayadaha oo hoos u dhacay (-1.10%).
- **Sicirka Agabka Qurxinta, qalabeynta iyo dayactirka Aqallada** ayaa isna bishii dhammaatay ee Oktoobar2020 waxa uu hoos u dhacay (-0.56%) boqolkiiba, halka bishii ka horeysay ee Sebteembar la diiwaan kor u kac dhan (0.66%). hoos u dhaca bishaan ee alaabaha qeybtaan ayaa waxaa keenay sicirka sicirka agabka iyo qalabka guryaha oo sare u kacay (-0.06%).

### Tusaha Sicirka Dambiisha: Qaybo Si Gaar Ah Loo Eegay Octobar 2020.

**Cuntada Iyo Cabitaanada, Kirada Guryaha, Adeegyada, Biyaha, Korontada, Gaaska Iyo Shidaaladda Kale** ayaa celcelis ahaan hadda ah qaybaha ugu muhiimsan dambiisha Addegga, maadama ay saamiga ugu badan ka yihiin kharashaadka qoysaska, tan ayaa ka dhigaysa qeybahan inay saameynta ugu badan ku yeeshaan isbedelka Tusaha guud ee Sicirka Dambiisha.

**Sicirka Cuntada Iyo Cabitaanada** ayaa intii lagu jiray Oktoobar2020 waxaa ku yimid sare u kac gaaraya (0.01%) marka loo barbar dhigo bishii Sebteembar oo uu jiray sicir dhac dhan (-0.85%). Sicir bararka sanadlaha ah ee qaybta cuntada iyo cabitaanada sanad dhamaadka bisha Oktoobar2020 ayaa gaarayey (5.30%) marka loo eego sicir bararka sanad dhammaadkii ama 12kii billood ee ku ekaa Sebteembar 2020 kaas oo gaarayey (5.81%).




## Jadwalka 2aad: Isbedelka Billaha ee qeybaha ugu muhiimsan Cuntada

Magaca shayga	Agoosto	Sebteembar	Octoobar
Cuntada iyo Cabitaanada	-1.52	-0.85	0.01
Cuntada	-1.48	-0.92	0.02
Rootiga, Bariisaka, Burka iyo badarka	-4.28	0.02	0.21
Sonkorta	1.54	-3.12	-0.06
Hilibka noocyada xoolaha	-2.06	-1.35	3.35
Kalluunka	7.72	0.0	0.0
Caanaha liiska ah iyo kalluunka	0.52	2.09	2.07
Saliida iyo ashyaada dufanka leh	-6.34	-3.70	-4.90
Miro Beeraadka sida Cambaha & Muuska	-8.57	6.81	1.61
Khudaarta Cagaaran	-3.37	-7.46	2.78

Sicirka Qaybta Kirada Guryaha, Adeegyada Biyaha, Korontada, Gaaska Iyo Shidaalada Kale ayaa bishii Oktoobarwajahday kor u-kac gaaraya (0.51%) halka uu bishii Sebteembar la diiwaan gashay hoos u dhac gaaray (-0.28%). Sicir bararka sanadlaha ah ee 12kii bilood ee ku ekaa Oktoobar2020 ayaa ahaa koror dhan (1.24%) halka sanadkii ka horeeyey ee ku dhammaanayey bishii Sebteembar ee 2020 la diiwaangashay sicir koror dhan (0.17%),

## Jaantuuska 3aad: TSD Guud Iyo Qeybo Si Gaar Ah Loo Eegay




Source: Puntland Statistics Department

## Dhaqdhaqaaqa Sanadlaha ee Tusaha Sicirka Dambiisha ee Sanad Dhamaadka Oktoobar2020

Isbedelka sanadlaha ah ee heerka sicir bararka ee 12kii billood ee u dhexeeyey billihii Oktoobar2019 iyo Oktoobar2020 ayaa ahaa 5.53 boqolkiiba, halka sanad dhammaadkii ku ekaa Sebteembar 2020 la diiwaan gashay sicir koror dhan 5.57 boqolkiiba.

Qaybaha badeecadaha ee sicirkoodu sida xoogan u siyaday 12-kii billood ee u dhexeeyay Oktoobar2019 iyo Oktoobar2020 ayaa kala ah: Maqaaxiyaha iyo Huteelada (+21.32%), Caafimaadka (18.17%), dhaqanka iyo madandaalada (+15.31 %), Gaadiidka (11.79%), Tubaakada iyo Qaadka (10.45%). Qalabka iyo Adeegyada isku jirka ah (10.22%). Guud ahaan qaybaha badeecadaha oo dhan ayaa la kulmay sicir kac togan.

**TSD: Jaantuuska 4aad; Sicir-bararka sanadlaha ah ee qeybaha badeecadaha iyada oo loo eegayo hanaanka caalamiga ah ee kala soocida badeecadaha; Oktoobar2020.**



## Qaybaha sicir bararka Xoogan ee sanadlaha ah uu ku dhacay sanad dhamaadka Oktoobar2020

- **Makhaayadaha Iyo Huteelada** ayaa sanad dhammaadkii Oktoobar2020 Kor u kacay (21.31%) halka sanad dhamaadkii Oktobar 2020 uu kordhay 20.95%, kor u kacan waxaa sababay sicirka adeegyada Makhaayadaha (+23.35%) iyo Hoteelada (7.76%).
- **Caafimaadka** ayaa 12kii billood eek u dhammaanayey Oktoobar2020 kor u kacay 18.17% marka la barbardhigo sicirbararkii sanadkii ku dhammaanayey Oktoobar2019, kaaso oo gaaryey(16.89%), Sicir kororkan waxaa sababay Adeegyada Cusbitalada oo siyaaday (+22.24%), iyo sicirka agabka caafimaadka iyo dawada oo kordhay (18.35%).

- **Dhaqanka iyo Madadaalada** ayaa sanad dhammaadkii Oktoobar2020 kor u kacay 15.31% halka sanad dhamaadkii Oktoobar2019 uu kordhay 20.11%, kor u kacay waxaa looo intirinayaa Agabyadda isku jirka ah ee dhaqanka iyo madadaalada oo kacay (51.83%) iyo sicirka buugaagta oo kacay (42.76%).
- **Adeegga iyo agabka Gaadiidka** ayaa sanad dhammaadkii Oktoobar2020 kordhay 11.79%, marka la barbardhigo sanad dhamaadkii dhiggiisa ahaa ee Oktoobar2019 oo uu jiray koror dhan 8.77%, kor u kacay ayaa ka yimid Adeegga Gaadiidka (16.29%). Iyo Gadashada Gawaaridda oo siyaadey (4.47%).
- **Sicirka Tubaakada Iyo Jaadka** ayaa sanad dhammaadkii bisha Oktoobar2020 kor u kacay 10.45%, halka uu sanad dhamaadkii Oktoobar2019 uu kordhay 14.14%, Kor u kacay ayaa ka yimid: Jaadka (+22.92%) iyo Tubaakada (+5.07%).
- **Qaybta Adeegyada isku dhafka ah** ayaa sanad dhammaadkii Oktoobar2020 kor u kacay 10.22%, marka la barbardhigo sanad dhamaadkii ka horeeyey ee Oktoobar2019 uu kordhay 10.16% , Kor u kacay ayaa ka dhashay qiimo koror ku yimid sicirka agabka xaragada (27.47%) iyo agabka daryeelka shakhsiga (6.10%).


Dhamaan isbedelka sicirka qaybaha Tusaha Sicirka Adeegga Dambiisha ayaa sanad dhamaadkii Oktoobar2020 ahaa mid togan.

### Tusaha Sicirka Adeegga Dambiisha: Sookoobidda dhaq-dhaqaaqaha iyo Dhibco ku biirinta Miisaaman

Jadwalka 3: Tirooyinka ugu muhiimsan dhaq-dhaqaaqyada Oktoobar2020 (Index = 100 at 2015)

COICOP Classification Group	Oct-19 Index	Sep-20 Index	Oct-20 Index	Sep-20 to Oct-20 (monthly) % change	Oct-19 to Oct-20 (annual) % change
TSD ee dhaman qaybaha badeecadaha	84.55	89.05	89.23	0.20	5.53
Cuntada iyo Cabitaanada	82.16	86.51	86.52	0.01	5.31
Tubaakada iyo Jaadka	88.73	99.42	98.00	-1.43	10.45
Dharka iyo Kabaha	84.39	91.85	91.95	0.12	8.96
Kirada guryaha, Biyaha, korontada, Gaaska iyo Shadaalda kale	86.35	86.97	87.42	0.51	1.24
Agabka guryaha iyo Dayactirkooda	86.48	88.12	87.62	-0.56	1.33
Caafimaadka	81.52	94.51	96.33	1.92	18.17
Gaadiidka	89.03	98.11	99.53	1.44	11.79
Isgaarsiinta	86.83	87.61	87.49	-0.13	0.77
Dhaqanka iyo Madadaalada	93.01	107.58	107.25	-0.31	15.31
Waxbarashada	88.24	90.61	90.61	0.00	2.68
Maqaaxiyaha iyo Huteelada	70.00	85.76	84.93	-0.97	21.32
Badeecadaha iyo Adeegyada isku jirka ah	114.37	125.98	126.06	0.06	10.22

**Jaantuuska 5aad: Sida qaybaha Dambiishu ay Dhibcaha ugu biiriyaan Tusaha Guud iyada oo la eegayo miisaanka Qeyb waliba leedahay**



Source: Puntland Statistics Department

FG: Saameynt ay qayb kasta oo kamid ah qeybahaha uu kakooban yahay hanaanka kala soocida badeecadaha ay ku yeelanayso isbedelka Tusaha guud ee Sicirka Adeegga Dambiisha waxay ku xiirantahay hadba saami culeyska ay qeyb walba ka tahay culeys dhismeedka Guud.